

Wax ka iibsiga Farmers' Market (suuqa Khudaarta iyo cuntada) muddada lagu jiro

COVID-19



Guriga joog haddaad bukto.

- Gashiga maaskaraha macnaheedu ma aha inay dadka bukaa dibadda u baxaan oo ay dadka dhexgalaan.



U qorsheyso guul

- Ka eeg baraha internetka ama bogagga Facebook inaad hesho wixii arrimaha ku soo kordha. Horay u wac ama imayl u dir haddii aadan hubin isbeddellada.
- Soo ogow haddii suuqaagu la isticmaalayo fursadaha horay u dalbbasho ama baabuur-ku-dhexmarid (drive-through).
- Samayso liis waxyaabo soo iibsi.



Gacmaha iska dhaq (kahor & kaddib)

- Gacmahaaga iska dhaq inta aadan ka soo bixin guriga iyo kaddib markaad soo noqoto.
- Rugo gacmo-dhaqasho ayaa laga heli karaa suuqa khudaarta.



Nadiifi kiishashka dib loo isticmaali karo

- Ku dhaq mishiinka oo daryeel kiishashka inta u dhaxeysa safarada wax soo iibsiga; kaliya isticmaal kiishash nadiif ah.
- Suuqyada midba goonidooda ayay u yeelan karaan shuruudo kala duwan markay yihiin kiishashka dib loo isticmaali karo— horay iskaga hubi.



Isticmaal maaskaro

- Muuji inaad daneynayso caafimaadka: u xiro maaskaro suuqa khudaarta, hadday suurogal tahay.



U fiirso tilmaamaha

- Suuqyada ayaa ku soo dhejin kara tilmaamo ku yaal ogaysiinno laga helo meelo ka mid ah suuqa.
- Suuqyada ayaa dhici karta inay yeeshaan dad tabaruc ah oo tilmaama dadka yimaad goobta.
- Fursadaha horay u dalbashada ama gaari ku dhex maridda ayaa dhici karta inuu suuqaagu isticmaalo.



Filo daahitaanno

- Tirada macaamiisha loo oggolyahay inay meesha wax ka iibsadaan dukaameystaan hal mar waa la xaddidi doonaa. Fadlan dulqaado.



6 fiit in le'eg (dherer 1 sac) u jir

- Dadka ka salaan sheedda: Gacan u haadi, calaamadda "nabadda" la wadaag, indhaha ururi adiga hoosta maaskaraha ka dhollacaddaynaya!



Kalidaa ahow markaad wax soo iibsanayso, hadday suurtagal tahay

- Soo kaxayso kaliya xubnaha reerka aan aadka looga maarmi karin.



Si dhakhso leh u adeegso

- Horay maskaxda ugu hay waxaad raadinayso (Samayso liis waxyaabo soo iibsi!)
- Sheyada u iibso sii dhakhso badan oo suurtagal ah.
- Iska ilaali inaad kooxo u urursanaataan.



Guriga wax ku cun

- Gawaarida cuntada iyo cuntada diyaarka ah ayaa laga yaaba inay goobta u jiraan kaliya in cuntada la qaato.
- Cunto goobta laguma cuni karo.
- Markaad ku cunayso guriga cunto dibadda laga soo iibsaday:
1) Ka fur waxyaabaha u duuban 2) Gacmaha iska dhaq 3) Ka soo cuntada 4) Iska tuur waxau ku duubnayd 5) Gacmaha mar labaad iska dhaq 6) Ku raaxayso!



U qorshayso habkaad lacagta u bixin lahayd

- Lacagaha waraaqda ah ee caddadka yar qaado sii sarif loogu helo.
- Kaararka deynta ama hababka horay u bixinta ayaa dhici karta inay jiraan – hory uga hubsoo suqaaga.